Australian Government
Department of Agriculture, Fisheries and Forestry

# Sahanka Haraaga Qaranka ee 2021-2022

Ri'

Sahanka Haraaga Qaranka (NRS) oo ka tirsan Wasaarada Beeraha, Kalluumaysiga Daaqa ee Xukuumada Australiya ilaa 1992 ay kharashkeeda bixisay wax-soosaarka (industries) kuna bixiyey cashuuraha iyo kunturaado toos ah.

NRS waa qayb duruuri ah oo qaabdhismeedka maaraynta haraaga daawada xayawaanka ee Australiya xagga bixinta caddaynta habdhaqanka wanaagsan ee lagu kaalmaynayo sharciga xakamaynta-isticmaalka iyo tilmaamayaasha.

Barnaamijyada NRS waxay kormeeraan heerarka, iyo khataraha la xiriira kana imanaya dilaha-cayayaanka iyo haraaga daawooyinka xoollaha iyo wasakh kiimikeedka  ku jira badeecadaha cuntada Australia. Barnaamijyadu way caawimaan si ay u sahlaan una dhiirigeliyaan sidii joogto looga heli lahaa suuqyada gudaha iyo dibada. NRS waxay kaalmaysaa kuwa halbowlaha u ah wax-soo-saarka asaasiga ah iyo warshadaynta cuntada kuwaas oo bixiya hilib taya-leh, haruurka iyo wixii beeraha ka soo baxa oo buuxiya mustawayaasha Australiya iyo kan caalamka ee dhigiisa ah.

### Qodobada ugu muhiimsan

- Sanadihii 2021 ilaa 2022, u hogaansanaanta guud ee mustawayaasha Australiya wuxuu ahaa boqolkiiba 98.89%.
- Soosaarayaasha hilibka riyaha ee Australiya waxay sii wadeen muujinta mustawa aad u sarreeya ee hab-dhaqanka beeraha..
- Sahanka Haraaga Qaranka tayadiisa nadaamka maaraynta (QMS) waxaa ansixisay ISO mustawaha 9001:2015.

## Dulmarka Barnaamijka Ri'da

Barnaamijka ri'da wuxuu shaqaynayey in ka badan toban sanadood waxaana kharajkiisa bixiyey NRS qayb ka mid ah lacagaha ka yimaada cashuurta. Barnaamijku wuxuu ku lug leeyahay tijaabinta sambalada hilibka noocya badan oo dilaha cayayaanka, daawooyinka xoollaha iyo wasakhda ka timaada bay'ada.

Barnaamijku wuxuu xaqiijiyaa in dhoofinta riyuhu qanciyaan shahaadada dhoofinta iyo shuruudaha wadanka loo dhoofinayo. Intaas waxaa dheer, barnaamijku wuxuu kaalmeeyaa da'daalka xaqiijinta tayada wax-soo-saarka wuxuuna u suurtageliyaa tas-hiilaadka warshadaynta hilibka gudaha si loo qanciyo xukuumad Goboleedyada iyo xukuumadaha territoriga xagga shuruudaha laysan u samaynta.

## Ururinta sambalka

Dhowr sambal oo la ururiyey waxay ku salaysan yihiin heerarka wax soo saarka ee Australia iyo/ama suuqyada dhoofinta ee dibadaha ee hilibka la dhoofiyo.

Sambalada waxaa ururiya saraakiil xukuumadeed oo idman oo ka socda hiliblayda dhoofinta iyo saraakiisha xakamaynta tayada ee hawlgalada gudaha, oo ka socda kuwa loo soo xulay si aan kala sooc lahayn oo ka imanaya kuwa wax warshadeeya sida waafaqsan shuruudaha NRS.

## Baaritaanada ka baaraandega

Baarista laga baaraandegay waxaa loo sameeyey iyada oo lala tashanayo hay'adaha waxsoosaarka iyada oo lagu xisaabtamayo kiimikada laga diiwaangeliyey Australiya, asalka ama haraaga kiimikada iyo shuruudaha looga baahan yahay suuqa.

Dhowr nooc oo ri'ya ah ayaa lagu baaray dhowr nooc oo cayayaan dili ah, daawooyinka xoollaha iyo sun kiimikeedka  bay'ada sida lagu muujiyey Table-ka 1aad.

## Natiijooyinka

Sanadihii 2021 – 22, isku dar guud oo dhan 270 sambal ayaana la ururiyey si loo taxliiliyo. Natiijooyinkii ayaa la dhinac dhigay mustawayaasha Australiya markay khusayso mustawayaasha caalamka.

Soo koobida u-hogaansanaanta sambalka rida ee mustawaha Australiya lixdii bilood ee la soo dhaafay waxaa lagu muujiyey Table-ka 2. Natiijooyinku waxay muujiyeen u hogaansanaan aad u fiican waxayna tilmaamaysaa sida habdhaqanka hay'ada wax-soosaarka beeruhu u fiican yahay. Heer aad u sarreeya oo u hoganaansanaata ayaa caawima sii wadida sumcada iyo magaca riyaha Australiya suuqda dibada iyo kuwa gudaha.

Macluumaadka sanadeed oo kooban ee barnaamijka riyaha waxaa laga hellaa Wasaarada websaytkeeda oo ah: agriculture.gov.au/nrs-results-publications.



**TABLE-ka 1aad** Baaritaanka ka baaraandega ee barnaamijka riyaha

| Baaritaanka ka baaraandega | Kooxda kimikada | Waxyaallaha-la-baarayo |
|---|---|---|
| **Daawooyinka xoollaha iyo dilaha cayayaanka** | Baabi’inta dulanka (Anthelmintics) | waxaa ka mid ah macrocyclic lactones iyo benzimidazoles |
| | Lidka noolaha-aan-ishuqaban (Antimicrobials) | Waxaa ku jira aminoglycosides, anticoccidials, beta lactams, quinolones, macrolides, sulfonamides iyo tetracyclines |
| | Dheecaanada | oo uu ka mid yahay isudheelitiraha cusbada iyo sonkorta noolaha (corticosteroid) |
| | Daawooyinka kale | waxaana ku jira beta-agonists iyo daawada lidka caabuqa |
| | Cayayaan dilaha | dilaha cayayaanka, dilaha fangaska, dilaha cagaarka/dhirta |
| **sun wasakheedka bay’ada** | Walxa ka kooban kaloriin | aldrin, chlordane, dieldrin, DDT, endrin, HCB, HCH, heptachlor, lindane, mirex, PCBs iyo pentachlorobenzene |
| | Dioxins | Dioxins iyo waxyaalla la mid ah dioxin PCBs |
| | Biraha | antimony, arsenic, cadmium, lead iyo mercury |

**TABLE-ka 2aad** Heerarka u-hogaansanaanta 6dii sanadood oo ugu dambaysay marka loo fiiriyo mustawayaasha Austaraaliya

| Sanado | Sambalada la ururiyey | Heerka u-hogaansanaanta (%) |
|---|---|---|
| 2016–17 | 294 | 100 |
| 2017–18 | 277 | 98.92 |
| 2018–19 | 277 | 99.64 |
| 2019–20 | 273 | 97.8 |
| 2020–21 | 300 | 99.33 |
| 2021–22 | 270 | 98.89 |



## Xulashada sheybaarka iyo wax qabadka.

NRS waxay kuntaraad siisaa sheybaarada sii ay u taxliiliso sambalada badeecada cayayaan dilaha/haraaga daawada xoollaha iyo sumaha bay'ada.

Sheybaarada waxaa lagu xushaa mihnad habka qandaraas bixinta ee Xukuumada Australiya oo ku salaysan aqoontooda qiimaha lacag ahaan. Sheybaarada waa in lagu abaal mariyaa mustawayasha caalamiga ah ee ISO/IEC 17025 bilawga tijaabada.

Sheybaarada qandaraaska la siiyey waa kuwa mihnad ahaan ay tijaabisey NRS si loo xaqiijiyo ansaxnimada natiijooyinka la taxliiliyey (laga-baaraandegay) iyo kartidooda farsamo.

NRS waxay u aqoonsatay Hay'ada Tijaabinta ee Ururka Qaranka (National Association of Testing Authority) bixiyaha mihnada tijaabinta laga soo bilaabo Juulay 2005.



## Suuqyada dhoofinta ee Caalamka

NRS waxay haysaa macluumaad leh haraaga xadka ugu sarreeya (MRLs) kaas oo lagu dabikhi karo Australia iyo suuqyada waaweyn ee waxsoosaarka kuwaas oo ay kaalmaysay NRS. Natiijada taxliilin kasta waxaa laga hubiya inay u hogaansan tahay mustawaha Australia iyo MRLs-ka caalamka ay khusayso.

Mustawaha MRL-ka Australia arag ama gal **legislation.gov.au/Series/F2019L01105**.

Shuruudaha MRL ee dhoofiyayaasha caalamka qaarkood arag linkiga **agriculture.gov.au/nrs-databases**.

GICA
Goat Industry Council of Australia
DAIRY | MEAT | FIBRE | RANGELAND

ISO 9001 2015 CERTIFIED

**Waxweydiimaha guud**
Telefoonka 1800 420 919

**Cinwaanka boostada**
National Residue Survey
GPO Box 858, Canberra ACT 2601 Australia

agriculture.gov.au/nrs
Email nrs@agriculture.gov.au

ADA311.0721